Hagge loogu talogalay Heerarka Taakulaynta Adeega ee Deegaanka

Nolol La caawiyay, Kooxo Guri, Kooxo Guryo Tababar

Maxay yihiin heerarka taakulaynta adeega ee deegaanka?

Heerarka taakulaynta adeega ee deegaanka waxay sharxayaan tirada iyo nooca caawimaada uu u baahanyahay macaamiilka si uu ugu noolaado asaga/ayada bulshadeeda dhexdooda. Waxaa jira lix heerar adeeg deegaan, heerka 3-aad waxaa loo qaybiyay labbo-heerar hoose. Faah-faahinada ku saabsan heerarka taakulaynta adeega ee deegaanka waxay ku yaaliin dhabarka ama gadaasha xaashidan.

Sidee loo xadidaa heerarka adeega deegaanka?

Heerarka adeega deegaanka waxaa lagu xadidaa jawaabaha lagu helo su'aalaha ku qoran Qiimeynta Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA).

Maxaan sameeyaa haddii uu jiro is-afgaran waa ku saabsan heerka adeega deegaanka?

Haddii macamiilka ama wakiilkeeda/wakiilkiisa uu diido ama aanan ku raacin heerka adeega deegaanka, la xariir maamulaha kiiska ee macamiilka. Haddii uu weli sii jiro is-afgaran waaga, raac nidaamka hawsha rafcaanka Maamulka Naafooyinka Koriinka.

Sidee loo xadidaa heerarka adeega macamiilka?

Heerka adeega qofka ee macamiilka waxaa lagu xadidaa qiimeynta Maamulka Naafooyinka Koriinka. Qiimeynta waxaa lagu buuxiyaa ayada oo lala tashado bixiyaha adeega deegaanka. Cunsurada lagu tixgeliyo heerka qiimeynta waxaa ka mid ah baahooyinka taakulaynta gaarka ah ee lagu qoray gudaha qiimeynta, taakulooyinka ay bixiyaan dadka kale, iyo tirada macaamiisha wadaagaya taakulooyinka. Caadi ahaan dadka ku wada nool guri waxay wadaagaan taakulada iyo kharashka lagu noolaado.

Maxaa dhacaya haddii ay isbedelaan baahooyinka taakulaynta?

Haddii uu macamiilku qabbo isbedel weyn oo ku dhaca baahooyinka taakulaynta oona la filanayo in isbedelka uu sii soconayo, la xariir maamulaha kiiska si aad u samaysid qiimeyn muraajaco ah. Haddii uu isbedelku yahay mid kumeel gaar ah (tusaale ahaan, macamiilku uu sameeyay qaliin una baahanyahay taakulayn dheeraad ah oo loogu talogalay dhowr todobaad), bixiyaha adeega wuxuu codsan karaa kordhin saacadaha taakulaynta kumeel gaarka ah.

Maxaan sameeyaa haddii ay dhacdo xaalad caafimaad deg-deg ah?

Dhammaan macaamiisha qaadanaysa adeegaha deegaanka waxay leeyihiin gelid 24-saacadood ah oo ay u galaan adeeg bixiyayaasha marka ay u baahdaan, ayada oo aan la eegaynin heerka adeega deegaanka.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan adeegaha deegaanka ama heerarka deegaanka, fadlan soo wac kadibna codso in aad la hadashid Maamulaha Dhaqaalaha deegaankaaga. Su'aalaha ku saabsan heerka adeega deegaanka waa in lagu aadiyaa dhinaca maamulaha kiiska ee macamiilka.



Spokane	1-800-462-0624
Yakima	1-800-822-7840
Everett	1-800-788-2053
Seattle	1-800-314-3296
Tacoma	1-800-248-0949
Olympia	1-800-339-8227

Washington State Department of Social & Health Services

Transforming lives

Heerarka Taakulaynta Adeega ee Deegaanka

TAAKULAYNTA LOO BAAHANYAHAY	SIFOOYINKA	HEERKA ADEEGA LA FILANAYO[1]
Todobaadle ah ama Ka yar (Heerka Taakulada 1-aad)	Baahida horjooge, tababar, ama caawimaad jireed ku saabsan meelaha inta baddan u dhaca si todobaadle ama ka yar, sida dukaamaysi, bixinta biilalka, ama ballamo caafimaad. Guud ahaan madax banaani ku saabsan meelaha taakulaynta kuwaas oo u dhaca si maalin le ah ama dhowr maalmood kasta.	Macaamiisha lagu sameeyay qiimeyn si ay ugu baahdaan heerkan waxay si joogto ahi u qaataan taakulo ah qaab todobaadle ama ka yar.
Marar Baddan Todobaad kasta (Heerka Taakulada 2-aad)	Uu awoodo in uu sii ilaaliyo caafimaadka iyo ammaanka maalin buuxda ama wakhti ka baddan UNA baahan horjoogid, tababar, ama caawimaad jireed ay la jirto hawlo u dhaca caadi ahaan dhowr maalmood kasta, sida guri ilaalin fudud, qorshaynta cuntada, ama haggid iyo taakulayn ay la jirto xiriiro. Guud ahaan uga madax banaan taakulada ah meelaha ay khasab tahay in ay u dhacaan si maalin le ah.	Macaamiisha lagu sameeyay qiimeynta si ay ugu baahdaan heerkan waxay qaataan taakulo marar baddan todobaad kasta.
Kala go'go Maalin le ah - Hoose (Heerka Taakulada 3A)	Uu awoodo in uu sii ilaaliyo caafimaadka iyo ammaanka muddooyin gaaban oo wakhti ah (saacado, laakiin aanan ahayn maalmo) AMA u baahan horjoogid, tababar, ama caawimaad jireed ay la jirto hawlo u dhaca caadi ahaan maalin walba, sida qubeysashada, labbisashada, ama qaadashada daawooyinka.	Macaamiisha lagu sameeyay qiimeynta si ay ugu baahdaan heerkan waxay qaataan taakulo maalin walba ah.
Kala go'go Maalin le ah - Dhex-dhexaad ah (Heerka Taakulada 3B)	U baahan horjoogid, tababar, ama caawimaad jireed ay la jirto hawlo baddan kuwaas oo caadi ahaan u dhaca si maalin le ah AMA u baahan baaritaan joogto ah oo lagu sameeyo caafimaadka iyo ammaanka ama ay sabab u tahay joogsi ku dhaca hawlaha joogtada ah.	Macaamiisha lagu sameeyay qiimeynta si ay ugu baahdaan heerkan waxay qaataan taakulo maalin le ah waxayna samayn karaan baaritaano inta lagu guda jiro saacadaha wakhtiga habbeenka, intiiba loo baahdo.
Ku dhowaadka Ku dhow (Heerka Taakulada 4-aad)	U baahan taakulo lagu sameeyo hawlo baddan kuwaas oo u dhaca caadi ahaan si maalin le ah AMA awoodo in uu sii ilaaliyo caafimaadka iyo ammaanka muddooyin wakhti gaaban ah (kayar 2 saacadood, haddiiba ay jirto) UNA baahan baaritaano caafimaad iyo ammaan mar-mar ah ama taakulo inta lagu guda jiro saacadaha habbeenka ah.	Macaamiisha lagu sameeyay qiimeynta si ay ugu baahdaan heerkan waxay qaataan taakulooyin ku saabsan ku dhowaadka ku dhow 24 saacadood maalin kasta. Saacadaha taakulada waxaa lala wadaagi karaa qoyska deriska ah.
Maalin Joogto ah + Habbeen Joogto ah (Heerka Taakulada 5-aad)	Uu yahay guud ahaan mid aanan awoodin in uu ilaaliyo caafimaadka iyo ammaanka AMA u baahan taakulo lagu sameeyo hawlo baddan kuwaas oo u dhaca si maalin le ah ama ku dhowaadkii maalin kasta IYO caadi ahaan u baahan shaqaale habbeen oo si joogtai ahi guriga u jooga.	Macaamiisha lagu sameeyay qiimeynta si ay ugu baahdaan heerkan waxay qaataan taakulo 24 saacadood ah maalin kasta.
Ilaalinta Bulshada (Heerka Taakulada 6-aad)	Uu yahay mid ku qoran Barnaamijka Ilaalada Bulshada.	Macaamiisha lagu sameeyay qiimeynta si ay ugu baahdaan heerkan waxay qaadan doonaan horjoogid maalin kasta oo ah 24 saacadood midaas oo ay sida ku qoran siyaasada Barnaamijka Ilaalinta Bulshada.

[1] *Tirada saacadaha adeega laga helo dhinaca bixiyaha adeega deegaanka waxaa dhici karta in ay kala duwanaadaan. Midaan waa mid ku salaysan haddii qaar kamid ah taakulooyinka ay bixiyaan shaqaale aanan-deegaanka ahayn ama taakulooyin dabiici ah, macamiilku uu diidayo adeegaha, ama darnaanta baahooyinka taakulada macamiilku ay tahay heer gaar ah wakhtigaasi. U gelida shaqaalaha deegaanka marka ay jirto xaalad caafimaad deg-deg ah waxaa helaya dhammaan macaamiisha, 24 saacadood maalintii, ayada oo aan la eegaynin heerka adeega deegaanka.*

DSHS 22-1184 SM (Rev. 2/18) Somali